



Qoysaska qaaliga ahow,

Hadaan nahay Hamilton-Wentworth District School Board (HWDSB), waxaa naga go'an in aan aqoonsano meeshana ka saarno caqabadaha si aan ardayda dhammaantood u siino deegaan taageeraya, loo dhanyahay, ixtiraamna kajiro.

Si aan wax badan uga ogaano ardaydeena, waxaan samayn doonaa tirakoob ikhtiyaari ah oo qarsoon. Marka la gaaro Abriil 2021, *Dhammaan Waan Xisaabinaynaa: Tirakoobka Ardayda HWDSB 2021* waa la furay su'aalana laga weydiiyay aqoonsiga ardayda (asalka, jinsiga, iyo iwm) si loo ogaado waxna looga qabto caqabadaha hanaanka kajira. Ayada oo ay sabab u tahay cudurka safmarka ah iyo heerka ka jawaabcelinta oo hooseeya, waxaan mar labaad furaynaa Tirakoobka Ardayda si ardayda oo dhan loo siiyo fursad ay ku dhammaystiri karaan tirakoobka. Arintaani waxay dhacaysaa laga bilaabo Noofambar 29, 2021 ilaa Diisambar 16, 2021.

Guddiyo dugsi oo fara badan ayaa sameeyay tirakoobka ardayda. Xaqiiqdii, Xeerka Kahortagga Cunsurinimada, 2017 iyo Qorshe Howleedka Sinaanta Waxbarashada ee Ontario(Ontario's Education Equity Action Plan) waxay guddiga dugsiga uga baahan yihii in ay soo aruuriyaan soona gudbiyaan xogtaan. Sidoo kale waa mashruuc mudnaan u leh Qorshe Howleedka Sinaanta ee HWDSB.

Waxaan ognahay in weydiinta qofka aqoonsigiisu noqon karto mid uusan ku qanacsanayn, waxaan u arinkaan u samayn doonaa qaab taxaddar leh. Wuxaan la tashanay arday, qoysas, shaqaale, iyo xubnaha bulshada si tirakoobku gacan uga gaysto in HWDSB ay qaadato go'aano caddaymo ku salaysan si ay u taageerto sinaanta, guusha ardayga iyo badqabkiisa.

[Sidee ayay u dhici doontaa?](#)

Ardayda Rowdada ilaa Fasalka 4aad: Foom ayaa la soo galin doonaa bogga loogu tala galay Waalidiinta. Waalidiinta iyo Mas'uuliyiintu waxay bookhan karaan Bogga, waxay furi karaan foomka, waxayna dhammaystiri karaan Tirakoobka Ardayga ee bartan kujira. Nuqulo la daabacan karo ayaad heli kartaa marka aad ka dalbato macalinka canuggaaga. Fadlan hal foom oo tirakoob oo keliya ka buuxi halkii ardayba (qaab onleen ah ama aad daabacday).

Fasalada 5 ilaa 12 - Ardayda fasalka xaadira iyo kuwa fogaan aragga ku dhigta: Wuxaan, mar labaad, iimayl ugu soo diri doonaa lifaaq amaan ah ardayda dhigata fasalada 5 ilaa 12, si ay u dhammaystiraaan foomka tirakoobka si onleen ah inta lagu jiro wakhiyada xiisaduhu socdaan, ayada oo macalinku taageerayo. Ardayda waalidiintood/dadka mas'uulka ka ah ay horey u codsadeen in AYSAN ka qaybqaadanayn tirakoobka ma heli doonaan iimaylka.



Maxaa ay weydiinaysaa?

Ayada oo ay ku xiran tahay da'da ardayga, su'aalaha ku jira tirakoobka waxay ku weydiin karaan luuqadda ardayga, aqoonsiga Asalka, isirka, qowmiyadda, diinta, aqoonsiga jinsiga, rabitaanka galmaada, naafanimada(awoodaha), goobta uu ku dhashay iyo xaaladdiisa dhalasho/soo galootinimo.

Sidee ayay HWDSB u ilaalinaysaa macluumaadka shahsiga ee ardayga?

HWDSB waxaa ka go'an heerarka ugu sareeya ee dhowrsanaanta iyo qarsoonaanta marka ay aruurinayo macluumaad ku saabsan ardayda iyo qoysaska. Xogta tirakoobka ardayga waxaa la aruurinayaay ayada oo la isticmaalayo fasaxa Xeerka Kahortagga Censuriniimada, 2017, S.O. 2017, c. 15, Xeerka Waxbarshada, R.S.O. 1990, c. E.2, waxayna u hogaansamaysaa Xeerka Xoriyadda Macluumaadka ee Magaalada iyo Ilaalinta Siraha, R.S.O. 1990, c. M.56.

Tirakoobka ardaydu waa mid qarsoon, laakiin ma ahan mid bilaa aqoensi ah. Jawaabaha arday kasta ayaa la isu gaynayaa si loo taxliiliyo si uusan macluumaadka ardaygu u noqon mid la ogaan karo cidda uu yahay. Jawaabaha la aruuriyay waxaa lagu kaydin doonaa bar xogta lagu kaydiyo, oo amaan ah waxaana kaliya gali kara shaqaalaha Cilmibaarista & Taxliilinta HWDSB ee fasaxa u haysta si ay u ogaadaan una soo guudmaraan jihoyinka ardayda HWDSB dheddooda.

Ma waajibaa?

Buuxinta tirakoobku waa mutadawacnimo. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ardayda ka dalbanaynaa inay ka qaybqaataan si aan sawir sax ah uga helno tirada ardaydayada. Heer jawaab celin oo sareeya wuxuu naga caawin doonaa in aan ogaano caqabadaha, samayno istiraatiijiyado, waxna laga qabto caqabadaha horaagan guulaha ardayga iyo badqabkiisa anaka oo isticmaalayna barnaamijayadayaada iyo ilahayaga. Ardayda horey uga baxday ma heli doonan lifaaqa xog aruurinta marka ay mar labaad furanto. Qoysaska aan doonayn in canuggoodu ka qaybqaato horeya aan uga bixin waxay iimayl u diri karaan research@hwdsb.on.ca.

Su'aalo ma qabtaa?

Waxaan kugu casuumaynaa kaagana jawaabaynaa su'aalaha inta aan diyaargaroobayno tirakoobka. Fadlan wax badan ka ogow websaytka yaga www.hwdsb.on.ca/weallcount, halkaas oo aad ka heli doonto Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo (FAQs) ee ku saabsan tirakoobka. Waxaad sidoo kale kooxda tirakoobka ardaygaaga kala xiriiri kartaa census@hwdsb.on.ca.

Waad ku mahadsan tahay in aad HWDSB ka caawiso in ay xogta u aruuriso qaab mas'uuliyad kujirto, si aan u abuurno natiijooyin loo siman yahay oo kajira hanaanka waxbarashada.



Daacad kuu ah,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Manny Figueiredo".

Manny Figueiredo
Agaasimaha Waxbarashada

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Paul Denomme".

Paul Denomme
Korjoogaha Guulaha Ardayga,
Sinaanta iyo Lafalgalka Ardayga

curiosity • creativity • possibility